



Su'aalaha u badanaa cod bixiyaha weydiyo (FAQs)

Maamulka doorashada Mareykanka aad ayuu u kala madax banaan yahay, gobol kasta wuxuu leeyahay sharciyo u gaar ah oo xakuma hababka cod bixinta. Sharciga federaalka wuxuu bixiyaa waxyaabaha ugu yar ee laga rabo in ay gobolada u hoggaansamo. Sidaas darteed, isha ugu wanaagsan xagga diiwaan gelinta iyo macluumaadka cod bixinta waa xafiiska doorashooyinka deegaanka.

Booqo eac.gov/vote si aad dhakhso u ogaatid linkiyada lagala xariiro bogga internetka doorashooyinka gobolka iyo midka deegaanka iyo si aad u heshid xafiiska doorashooyinka deegaanka.

Su'aalaha dheeraadka uu cod bixiyaha badanaa weydiyo (FAQs):

- [Ururka Qaranka Agaasimeyaasha Doorashada Gobolka \(National Association of Secretaries of State\) \(NASS\)](#)
- [Ururka Xogeyeyaasha Gobolka ee Qaranka \(National Association of Secretaries of State\) \(NASS\)](#)

Sida Doorashooyinka u Shaqeyaan

Yaa mas'uul ka ah doorashooyinka gobolkeyga?

Gobol kasta wuxuu qabaa sarkaal sare oo u qaabilsan doorashada, kaasoo kor ka eega kaalinta kor ka eegidda ama kaalinta la-tallinta doorashooyinka gobolka iyo federaalka. Hase ahaatee, badanaa doorashooyinka waxaa laga maamula heerka dagmada, inkastoo ay jiraan gobolo, magaalooyin ama xaafado fulliya doorashooyin. Ma dhacdo in labo gobol si isla mid ah u qabtaan doorashooyinka, mana jirto kala duwanaan gudah hal gobol. Doorashooyinka waxaa fullin kara hal qof ama waax, guddi ama guddiyo hoose oo qaabilsan doorashooyinka, ama isu keenid labo hay'ad ama ka badan.

Maamulka doorashada Mareykanka aad ayay u kala madax banaan yahiiin. Mareykanka waxaa laga helaa in ka badan 10,000 oo ah maamulada doorashada. Cabbirka maamuladaan waxay u dhexeyaan magalaooyinka ugu yaryar ee tirada cod bixiyeyaasha gaaraan dhowr boqol iyo maamulada ugu waaweyn waddanka ee tirada cod bixiyeyaasha gaaraan in ka badan 5 malyan. Sarakiisha doorashada deegaanka waxay kalo isku haleyaan shaqaalaha goobta cod bixinta ee la tababaray (badanaa ka socda labada xisbi) ee kaalmeeya cod bixiyeyaasha xilliga cod bixinta hore iyo Maalinta Doorashada. Hawsha tafatiran ay qabato awgeed, EAC waxay bixisaa tilmaamo iyo dhaqanka wanaagsan si ay u kaalmeeyso sarakiisha doorashada, hase ahaatee sharci ahaan ma laha awoodda kor ka eegidda doorashooyinka.

In badan ka ogow qofka ka shaqeeyo doorashooyinka gobolkaada, adiga oo booqda eac.gov/vote.

Maxuu sameyaa shaqaalaha goobta cod bixinta? Sidee ayaan u geysan karaa iskaa wax u qabso?

Shaqaalaha goobta cod bixinta waxay lagama maarmaan u yahiiin fullinta doorashooyinka. Shaqaalaha goobta cod bixinta waxay mas'uul ka yahiiin furitaanka goobta cod bixinta subaxnimada maalinta doorashada; xaadirinta cod bixiyeyaasha iyo soo saaridda warqadaha cod bixinta; kaalmeeynta cod bixiyeyaasha; fullinta sharciyada iyo hababka doorashada; xajinta silsiladda haynta warqadaha cod bixinta, qalabka cod bixinta, iyo saadka; xeritaanka goobta cod bixinta; iyo iswaafajinta tirada cod bixiyeyaasha soo xaadiray iyo tirada warqadaha cod bixinta laga dhiibtay goobtooda.

Caadi ahaan, shaqaalaha goobta cod bixinta waxaa tababara sarakiisha doorashada deegaanka, waxayna u shaqeeyaan sida kooxo (badanaa labada dhinac ka socda). Shaqaalaha goobta cod bixinta waxaa lagu dhaariyaa in ay adkeyaan sharciyada doorashada iyo in ay badbaadiyaan ammaanka doorashada.

La xariir xafiiska doorashooyinka deegaankaada ama booqo helpamericavote.gov si aad u heshid macluumaadka ku saabsan sida leysugu qoro shaqaalaha goobta cod bixinta gobolkaada.

Yaa kor ka eegi kara doorashada?

Kor ka eegeyaasha doorashada, oo marmar lagu magacaabo "kor ka eegeyaasha goobta cod bixinta," waa xubno ka tirsan dadweynaha ee kor ka fiiriya talaabadaha hawsha doorashada. Gobol kasta waxay qabtaa sharciyo iyo habab u gaar ah oo fiirin kara doorashada balse guud ahaan, kuwa kor ka eega doorashada waxay ahaan karaan xubnaha ururka sida xisbiga siyaasadda ama kooxda aan xisbi ka tirsaneen, wakiilada musharaxa, kor ka eegeyaasha caalamiga, kooxaha ka soo baxa goobta cod bixinta, aqoonta ama wakaaladaha munaasabka federaalka iyo gobolka.

Kaalinta daawadaha goobta cod bixinta waxay tahay in uu kor ka daawado iyo in la socdo doorashada, isagoo aan jebinin asturnaanta cod bixiyaha ama isagoo aan carqaladeynin doorashada. Gobolada waa ku kala duwan yahiin sharciyada xakuma kuwa daawada goobta cod bixinta. La xariir xafiiska doorashooyinka deegaanka si aad u heshid macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan xuquuqda iyo mas'uuliyadda saaran kuwa fiiriya goobta cod bixinta bulshadaada. In badan ka ogow kor ka eegidda doorashada gobolkaada adiga oo booqda eac.gov/vote.

Xaggee ayaan ka heli karaa natiijadaha doorashada?

Natiijadaha hore doorashada waxaa sarakiisha gobolka u soo gudbiya maamulada deegaanka kaddib marka la xero cod bixinta Maalinta Doorashada. Kaddibna natiijadaha aan rasmiga ahayn waxaa lagu soo dhajiyaa bogga internetka gobolka kaddibna waxaa loo gudbiyaa meediyaha. Waa isbaddali karaan natiijadahaas hore Maalinta Doorashada kaddib inta sarakiisha doorashada sii wadaan tirinta dhamaan warqadaha cod bixinta xaqa loo leeyahay, kana mid ah warqadaha cod bixinta ku meel gaarka, warqadaha cod bixinta maqanaha iyo warqadaha lagu soo diro boostada, iyo warqadaha cod bixinta ay dhiibtaan cod bixiyeyaasha militariga iyo kuwa ku sugan dibadda. Kaddib marka dhamaan warqadaha cod bixinta la tiriyo, leys waafajiyo, lana shahadeeyo waxaa lagu magacaabo olole, waxaa la soo dhajiyaa lana soo gudbiyaa natiijadaha kama dambayska, taasoo qaadan karta dhowr maalin ama marmar todobaadyo.

Booqa eac.gov/vote si aad dhakhso u ogaatid linkiyada lagala xariiro bogga internetka doorashooyinka gobolka ama deegaanka si aad u heshid macluumaadka ku saabsan natiijadaha ka soo baxa doorashada gobolka.

Maxay tahay sababta natiijadaha doorashada loo baddalo habeenka doorashada kaddib? Goornaa ayay natiijadaha doorashada noqon karaan kama dambays?

Sarakiisha doorashada waxay tiriyaan tiro badan warqadaha cod bixinta habeenka doorashada ilaa inta suurtoogalka ah, hase ahaatee natiijadaha soo baxa habeenka doorashada ma aha rasmi mana noqon karaan kama dambays. Gobol kasta wuxuu leeyahay sharciyo kala duwan oo la xariira marka la tirin karo warqadaha cod bixinta lagu soo diro boostada, kuwa ku meel gaarka, iyo kuwa militariga iyo warqadaha cod bixinta kuwa daggan dibadda. Tusaale ahaan, gobolada qaar waxay u baahan yahiin dhamaan warqadaha cod bixinta in la soo gaarsiiyo Maalinta Doorashada (Election Day). Kuwo kale ayaa jira oo ogol in la tiriyo warqadaha cod bixinta haddii boostada la sumadeeyo Maalinta Doorashada lana qabto taariikh go'an.

Kaddib marka la helo dhamaan warqadaha cod bixinta, waxaa bilowda hubinta ololaha. Badanaa, hawshaan waxaa la socda falanqeynta iskudarka cod bixinta si loo aqoonsado

loona xalliyo kala duwanaanta tirada cod bixiyeyaasha iyo tirada warqadaha cod bixinta ee la dhiibtay. Inta badan gobolada waxay kaloo fuliyaan xisaab xer si loo sii xaqiijiya in iskudarka tirada cod bixinta tahay sax.

Marka ololaha (iyo sida ka jirto gobolo badan, xisaab xer) la dhamaystiro, waxaa la shahadeeya natiijadaha ka soo baxay doorashada in ay yahiin kama dambays. Si aad u heshid macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan natiijadaha doorashada, ololaha doorashada iyo shahaadeynta, fiiri: <https://www.eac.gov/election-officials/election-results-canvass-and-certification>

Waxaa dhici karta in tartanada qaar ama muranka dib loo tiriyo, kaddib marka la fulliyo hawsha shahadeynta maxaa yeelay muranka wuxu la xariiraa tiro isu soo dhaw ama waxaa soo codsada musharax ama koox danneysa. Dib u tirinta waxay ka duwan tahay xisaab xerka la xariira muran ama qeybaha hoose muranka doorashada dib loo tiriyo, kaddibna waxaa dhici karta in wax iska baddalaan natiijadaha rasmiga ee ka soo baxa doorashada.

Siistemyada cod bixinta ma yahiin kuwo sagan?

Sugidda ammaanka siistemyada cod bixinta waxay lagama maarmaan u tahay dooraashooyin lagu kalsoon yahay. Guddiga Kaalmada Doorashada (Election Assistance Commission) (EAC) waxay soo saartaa tilmaamaha siistemka cod bixinta iskaa wax u qabso (VMSG), ee ah qodobada farsamada iyo sharuudaha, kana mid ah heerarka sugidda iyo anshaxa, lagana rabo in siistemyada cod bixinta la kulmaan si loo siiyo shahaadada. EAC waxay kaloo aqoonsan tahay goobaha cod bixinta ee tijaabiya siistemyada cod bixinta in ay waafaqsan yahiin heerarkan. Ka qeybgalka tijaabinta EAC iyo brograamka shahadeynta waa iskaa wax u qabso, hase ahaatee gobolo badan ay isticmaalaan tijaabinta iyo brograamka shahadeynta EAC Sidoo kale, gobolada waxay dooran karaan in ay hirgeliyaan sharuudo adag xagga siistemyada cod bixinta.

Gobol kasta iyo maamul ka jira deegaanka wuxuu isticmaalaa habab macquul ah iyo qalab lagu badbaadiyo habka cod bixinta oo hubiya in natiijadaheeda cod bixinta lagu kalsoonaan karo. Dhaqanka ugu wanaagsan waxaa ka mid ah in la isticmaalo qufulo, xermada muujisa faragelinta, kamerooyinka sekuritiga, tijaabinta siistemka doorashada ka hor iyo kaddib, xisaab xerka, iyo kantaroolada ammaanka internetka iyo qalabka. Gobol kasta wuxuu kaloo leeyahay sarkaal sare oo si rasmi ah uga shaqeeyo doorashada kaasoo suga in si adag loo raaco sharciyadaan iyo hababkaan.

Talaabadaha laga qaado sugidda ammaanka caadiga siistemyada cod bixinta:

- Gadashada siistemyada cod bixinta la tijaabiyay lana siiyay shahaado
- Brograamyada loo sameeyo dhamaan qalabka sida waafaqsan sharciyada iyo xeerka deegaanka

- Tijaabinta sax ahaanta qalabka cod bixinta, doorashada ka hor
- Fullinta doorashooyinka lala fulliyo shaqaalaha goobta doorashooyinka labada xisbi iyo kor ka eegeyaasha
- Xaqiijinta iskudarka tirada warqadaha cod bixinta
- Xisaabinta warqadaha cod bixinta si loo hubsado in tirada qalabka cod bixinta tahay sax
- Raad reebidda iyo xaqiijinta ugu yaraan labo (fikrad ahaan ka socdo labada xisbi) marqaati xagga wareejinta dhamaan warqadaha cod bixinta iyo qalabka cod bixinta laga wareejiyo hal koox ama hal meel loona wareejiyo midka xiga
- Adkeynta kantaroolka helitaanka sugidda ammaanka qalabka

Warqadaha cod bixinta waxay mar kasta haayo sarakiisha doorashada deegaanka ee fulliya doorashada. Doorashada kaddib, waxaa kaloo la rabaa in la sugo warqadaha cod bixinta si sugan loo keydiyo doorashada kaddib si loo fiiriyo sida in ay qeyb ka yahiin xisaab xerka ama dib u tirinta. Si aad u heshid macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan ammaanka doorashada, fiiri: <https://www.eac.gov/voters/election-security>.

Booqo [eac.gov/vote](https://www.eac.gov/vote) si aad dhakhso ula xariirtid bogga internetka doorashooyinka gobolka ama deegaanka si aad u heshid macluumaadka ku saabsan sugidda doorashada gobolka.

Ma ku kalsoonaan karaa natiijada ka soo baxa doorashada?

Waxaa jira hahab badan iyo hawlo oo lagu gaarsiiyo dadweynaha in lagu kalsoonaan karo natiijadaha ka soo baxa doorashooyinka. Badanaa, gobolka wuxuu sarakiisha doorashada siiyaa tababar iyo tilmaamaha aqoonyaanka laga siiyo maamulka doorashada. Ku dhawaad dhinac kasta doorashada waxay u baahan tahay ka-qeybgalka labo ama ka badan sarakiila la tababaray oo ku dhaartay in ay tiiryaan dhamaan sharciyada doorashada iyo in ay ilaaliyaan ammaanka doorashada. Kuwa korka ka eega doorashada, marmarna lagu magacaabo "fiiriyeyaasha cod bixinta," waa joogi karaan si ay ula socdaan ama u fiiryaan doorashada.

Mashiinada cod bixinta, sida skaanka warqadda cod bixinta, waa la hubiyaa kaddibna waxaa la siiyaa shahaadad xaqiijisa [heerarka sax ahaanta](#). Gobolo badan waxay dalbadaan in siistemyada cod bixinta lagu fulliyo tijaabinta xikmadda (logic) iyo sax ahaanta, doorasho kasta ka hor. Baaritaanka cod bixinta kaddib, inta badan gobolada waxay kaloo dalabadaa xisaab xer, doorasho kasta kaddib. Inta ay socoto xisaab xerka, sarakiisha doorashada waxay fiiryaan warqadaha cod bixinta si ay u xaqiijiyaan in tirada mashiinka sax tahay. Xisaabinta waxay hubisaa in warqadaha cod bixinta loo tiriyay sida ay ugu talo galeen cod bixiyeyaasha iyo in natiijadaha doorashada yahiin kuwo leysku halleyn karo. Macluumaad dheeraad ah oo

ku saabsan xisaab xerka waxaay laga heli karaa warbixinta EAC [Xisaab Xerka Doorashada Mareykanka oo Idil \(Election Audits Across the United States\)](#).

Booqo eac.gov/vote si aad dhakhso ula xariirtid bogga internetka doorashooyinka gobolka ama deegaanka si aad u heshid macluumaadka ku saabsan sida warqadaha cod bixinta loo tiriyo gobolkaada.

Sidee ayay sarakiisha doorashada uga hortagaan in qofna uusan codkiisa dhiibanin labo jeer?

Mid ka mid ah qodobada muhiimka dimoqraatiyada waxay tahay in qof kasta leeyahay hal cod keliya. Sarakiisha doorashada waxay qaadaan talabooyin badan si ay u hubiyaan in cod bixiyeyaasha dhiibtaan hal cad keliya doorashada, iyo haddii cod bixiyaha dhiibto in ka badan hal warqad cod bixin (taasi codkiisa ku dhiibto warqadda cod bixinta boostada kaddibna iskudayo in uu qof ahaan dhiibto codkiisa Maalinta Doorashada), in hal warqad cod bixin keliya la tiriyo. Si loo sameeyo tani, sarakiisha doorashada waxay mas'uul ka yaahin xajinta liisaska cod bixiyaha iminka jira oo sax ah, sidaas darteed gobolo badan ayaa isbarbar dhigga diiwaan gelinta iyo diiwaanada cod bixinta gobolo kale. Sarakiisha doorashada waxay hayaan diiwaan tafatiran oo ku saabsan marka cod bixiyeyaasha la siiyo warqadaha cod bixinta, iyo haddii warqadahaas cod bixinta la dhiibtay.

Haddii xaq u yeelashada cod bixiyaha aan la xaqiijin karin (tusaale, marka cod bixiyaha uusan ku jirin liiska cod bixiyeyaasha xaqa u yeesha, macluumaadka cod bixiyaha uusan dhamaystirneen ama uusan sax ahayn, ama cod bixiyaha horay boostada loogu diray warqadda cod bixinta loona ogolaaday in uu dhiibto codkiisa), waa dhici kartaa in loo ogolaado in uu codkiisa dhiibto warqadda cod bixinta ku meel gaarka ama ammaanka warqadda cod bixinta. Warqadaha cod bixinta ku meel gaarka waxaa laga soocaa warqadaha cod bixinta kale, waxaana laga shaqeyn doonaa lana tirin doonaa haddii sarkaalka doorashada xaqiijiyo in cod bixiyaha uu xaq u leeyahay iyo in uusan horay u dhiibanin codkiisa.

Marka cod bixiyaha codsado warqadda cod bixinta boostada, sarakiisha doorashada waxay xaqiijiyaan in codsiga uu soo jeediyay cod bixiyaha ka hor inta aan la soo saarin warqadda cod bixinta. Marka warqadda cod bixinta loo soo deliyo xafiiska doorashooyinka, sarakiisha (badanaa kooxaha labada xisbi) ayaa xaqiijiya saxiixa ama macluumaadka kale ee lagu aqoonsado kuna qoran warqadda cod bixinta si loo hubsado in uu dhiibtay cod bixiyaha. Haddii uu meesha ka maqan yahay macluumaadka loo baahan yahay ama aan la soo dhamaystirin, ama haddii loo baahan yahay saxiix balse uusan waafaqsaneen saxiixa ku jiro faylka, lama tirin doono warqadda cod bixinta. Kiisaska qaar, cod bixiyaha waxaa dhici karto in cod bixiyaha la soo ogeysiyo kaddibna la siiyo fursad uu ku saxo arrinta.

Booqo eac.gov/vote si aad dhakhso ula xariirtid bogga internetka doorashooyinka gobolka ama deegaanka si aad u heshid macluumaad ku saabsan sida loola socdo loona tiriyo warqadaha cod bixinta gobolkaada.

Diiwaan Gelinta Cod Bixiyaha (Voter Registration)

Sidee ayaan isu diiwaan geliyaa si aan u dhiibto codkeyga?

Dhamaan gobolada, marka laga reebo North Dakota, waxaad u baahan tahay in lagu diiwaan geliyo si aad uga qeybgashid doorashada. Sharuudaha xaq u yeelashada waa isbadbaddaan taasoo ku xeran gobolka, hase ahaatee guud ahaan si lagu diiwaan geliyo kaddibna aad codkaada dhiibatid, waa in aad:

- Tahay muwaadinka Mareykan ah
- Ugu yaraan jirtid 18 sanno Maalinta Doorashada (Election Day)
- La kullantid qaar ka mid ah sharuudaha dagganaashada

Waad iska diiwaan gelin kartaa si aad qof ahaan codkaada u dhiibatid adigoo isticmaala boostada, iyo internetka sida ay ogol yahiiin gobol badan. Haddii aan horay lagu diiwaan gelinin ama aad u baahan tahay in la casriyeyo diiwaankaada, hubso in aad sidaan samaysid ugu dambayn taariikhda gobolka qabatay. Waxaa jira dhowr gobol oo cod bixiyeyaasha u ogol in ay is diiwaan geliyaan Maalinta Doorashada (Election Day), hase ahaatee gobolada qaar waxay qabaan muddo go'an ilaa 30 maalin, doorashada ka hor.

Waxaa dhici karto in gobolada qaar u ogoladaan kuwa aan gaarin 18 sanno in ay horay isu diiwaan geliyaan si ay codkooda u dhiibtaan isla marka loo ogolaado.

Booqo eac.gov/vote si aad dhakhso ula xariirtid doorashooyinka gobolka ama deegaanka una heshid macluumaad ku saabsan sharuudaha diiwaan gelinta. Waxaad kaloo soo dagsan kartaa kaddibna daabacan kartaa Foomka Diiwaan Gelinta Cod Bixiyaha Boostada Qaranka. Foomkaan waxaa loo adeegsan karaa diiwaan gelinta si qofka codkiisa uga dhiibto gobol kasta marka laga reebo North Dakota, New Hampshire, iyo Wyoming, waxaana lagu heli karaa 21 luqad. Si aad u soo dagsatid foomkaan, tag: <https://www.eac.gov/voters/national-mail-voter-registration-form>

Sidee ayaan u baddali karaa xisbiga siyaasadda aan ka tirsanahay?

Badanaa habka aad fu baddali kartid xisbiga siyaasadda aad ka tirsan tahay waxay la mid tahay habka aad isu diiwaan gelisid.

Gobolada qaar waxay kaa rabaan in aad sheegtid xisbiga aad ka tirsan tahay waqtiga diiwaan gelinta, halka kuwo kale aysan la soconin xisbiga aad ka tirsan tahay. Haddii gobolka uu la socdo xisbiga aad ka tirsan tahay, waxaa jiri doono su'aal ku qoran foomka

diiwaan gelinta cod bixiyaha oo loogu talo galay in aad sheegtid xisbiga siyaasadda aa ka tirsanaan tahay.

Gobolada qaar waxay dalbadaan in cod bixiyeyaasha iska diiwaan geliyaan xisbiga ay raacsan yahiiin si ay codkooda uga dhiibtaan doorashooyinka musharaxiinta xisbiga. Doorashooyinka guud (kuwa caadi ahaan la qabto bisha Nofeembar), waxaad codkaada siin kartaa musharax kasta aad adiga dooneysid, iyadoo aan la fiirin xisbiga uu ka tirsan yahay.

Booqo eac.gov/vote si aad dhakhso u ogaatid linkiyada lagala xariiro bogga internetka doorashooyinka gobolka iyo midka deegaanka, waa meesha aad ka heli kartid macluumaad dheeraad ah.

Sidee ayaan ku casriyeyaa macluumaadkeyga cod bixiyaha (magaca, cinwaanka, xisbiga siyaasadda, iwm.)?

Badanaa habka casriyeynta diiwaan gelinta cod bixinta wuxuu la mid yahay habka diiwaan gelinta cod bixiyaha.

Casriyey macluumaadkaada diiwaan gelinta cod bixiyaha haddii:

- Aad guurtid
- Aad baddashid magacaada
- Aad rabtin in aad baddashid ka tirsanaantaada xisbiga siyaasadda
- Adan dhiibanin codkaada afartii sanno ugu dambaysay

Booqo eac.gov/vote si aad dhakhso u ogaatid linkiyada lagala xariiro bogga internetka doorashooyinka gobolka ama deegaanka si aad u heshid fursadaha diiwaan gelinta una dhiibatid codkaada. Waxaad kaloo soo gudbin kartaa warqadda [Foomka Diiwaan Gelinta Cod Bixiyaha Boostada Qaranka \(National Mail Voter Registration Form\)](#) adigoo ku soo hagaajiya xafiiska doorashooyinka deegaankaada. Foomkaan waxaa loo adeegsan karaa in dib leysu diiwaan geliyo si cod looga dhiibto gobol kasta marka laga reebo North Dakota, New Hampshire, iyo Wyoming, waxaana lagu heli karaa 21 luqad.

Sidee ayaan ku hubsan karaa macluumaadkeyga diiwaan gelinta cod bixiyaha?

Gobol kasta wuxuu samaystaa sharciyadiisa cod bixinta u gaarka ah, kana mid ah sida loo xaqiijiyo diiwaan gelintaada. Badanaa macluumaadkaada diiwaan gelinta cod bixiyaha waxaad ka hubsan kartaa internetka ama waxaad kala xariiri kartaa xafiiska doorashada deegaankaada. Haddii horay lagu diiwaan geliyay si aad codkaada u dhiibatid, waxaa muhiim ah in aad iska hubisid in macluumaadkaada diiwaan gelinta cod bixiyaha la casriyeyay iyo in uu yahay sax, weliba haddii aad dhawnahaan guurtay ama aad baddashay

magacaada. Booqo eac.gov/vote si aad dhakhso ula xariitid bogga internetka doorashooyinka gobolka iyo deegaanka, una heshid macluumaadka ugu tafatiran lana xariira meesha aad daggan thay.

Sidee ayaan ku joojin karaa diiwaan gelinteyda cod bixiyaha?

Maamulada gobolka iyo kuwa deegaanka waxay fursado kala duwan siin karaan cod bixiyeyaasha raba in ay joojiyaan diiwaan gelintooda cod bixinta. Haddii aad ku jirtid diiwaanka si aad codkaada u dhiibatid, aadna rabtid in aad joojisid ama ka noqotid diiwaan gelinta, cod bixiye ahaan, waxaa taa kugu kaalmeyn karo xafiiska doorashooyinka deegaankaada. Booqo eac.gov/vote si aad dhakhso ula xariitid bogga internetka doorashooyinka gobolka ama deegaanka, halkaas aad ka heli kartid liiska goobaha laga helo xafiisyada doorashooyinka.

Sidee ayaan u soo sheegaa cod bixiye ku jira diiwaanka balse aan dagganeen cinwaankeyga ama cod bixiye ku jira diiwaanka oo dhintay?

Haddii aad heshid warqadaha doorashada loogu talagalay qof aan dagganeen cinwaankaada ama qof dhintay, la xariir xafiiska doorashada deegaanka si aad u ogeysiisid.

In la casriyeyo liisaska diiwaan gelinta cod bixiyaha waxay muhiim u tahay maamulka doorashada. Dhamaan gobolada waxay qaadaan talabooyin la xariira casriyeynta liisaska diiwaan gelinta cod bixiyaha, hase ahatee marmar waxaa dhacda in xafiisyada doorashooyinka aysan ogeen in qofka uu guuray ama dhintay. Booqo eac.gov/vote si aad dhakhso ula xariitid bogga internetka doorashooyinka gobolka ama deegaanka, halkaas aad ka heli kartid liiska xafiisyada doorashooyinka deegaanka.

Siyaabaha loo codeeyo

Sidee ayaan u dhiiban karaa codkeyga Maalinta Doorashada (Election Day)?

Dhamaan gobolada waxay fursad siiyaan xod bixiyeyaasha qof ahaan yimaada si ay u dhiibtaan warqadooda cod bixinta Maalinta Doorashada (Election Day). Gobolada qaar, cod bixiyeyaasha waxay u baahan yahiin in ay tagaan goob cayiman si ay codkooda u dhiibtaan Maalinta Doorashada (Election Day), halka kuwo kale ay leeyahiin xarumaha cod bixinta halkaas uu cod bixiye kasta oo ku sugan deegaanka uu ka dhiiban karo warqadiisa cod bixinta.

Booqo eac.gov/vote si aad dhakhso ula xariitid bogga internetka doorashooyinka gobolka ama deegaanka si aad u xaqiijisid haddii xaafadaada laga heli karo sanduuqyada lagu rido.

Sidee ayaan u dhiiban karaa codkeyga goor hore?

Gobolo badan ayaa u ogol cod bixiyeyaasha in ay qof ahaan dhiibtaan warqadooda cod bixinta Maalinta Doorashada ka hor. Gobolada qaar, cod bixinta waqti hore waxaa la socda dhiibashada warqadda cod bixinta xafiiska doorashooyinka deegaanka, halka kuwa kale waxaad codkaada ka dhiiban kartaad goobta cod bixinta taasoo la mid ah cod bixinta Maalinta Doorashada ([Election Day](#)). Si aad u ogaatid haddii gobolkaada kuu ogol yahay in aad qof ahaan codkaada dhiibatid Maalinta Doorashada ka hor iyo meesha aad codkaada ka dhiiban kartid, booqo eac.gov/vote, dooro gobolkaada ama deegaan, kaddibna riix linkiga 'Maqane/Boosto iyo/ama Macluumaadka Cod Bixinta Waqti Hore' ('Absentee/Mail and/or Early Voting Information').

Sidee ayaan codkeyga uga dhiiban karaa boostada?

Gobol kasta wuxuu leeyahay sharciyo gaar ah oo ku saabsan qofka codkiisa ka dhiiban karo boostada. Gobolada qaar waxay u baahan yahiin cududaar si ay codkooda ugu dhiibtaan boostada, qaar waxay qof kasta u ogol yahiin in ay codsadaan warqadda cod bixinta boostada, halka qaar kalana ay toos warqadda cod bixinta ugu diraan dhamaan cod bixiyeyaasha. Tusalooyinka cudurdaarka waxaa ka mid noqon kara xanuun, dhaawac, itaal darri, waayeenimada qaar, qofka oo dibadda uga safara bulshadiisa Maalinta Doorashada, arday ku qoran kulliyad kana maqan guriga, ama u shaqeeya militariga. Haddii aad codsatid warqadda cod bixinta boostada, hubso in aad fiirisid waqtiga ugu dambeeyo aad soo celin kartid warqadaada cod bixinta si loo tiriyo (sida waqtiga qiyaas ahaan loo baahan in la soo celiyo).

Haddii aad heshay warqadda cod bixinta maqanaha ama warqadda boostada, si taxadir leh u akhri tilmaamaha ku saabsan sida iyo goorta la soo celiyo warqadda cod bixinta ee lagu soo diro boostada.

- Buuxi dhamaan macluumaadka la soo codsaday ee ku qoran bakhshadda soo celinta. Gobolada qaar waxay dalabadaan xafiiska xaqijinta (notary) ama saxiixa marqaati marka uu doono in uu boostada ku soo celiyo warqadaha.
- Haddii bakhshadaada soo celinta aysan ku qorneen in h.oray loo bixiyay kharashka boostada, hubso in ay shabadda ku filan tahay bakhshadda ka hor inta aadan warqadda cod bixinta ku soo dirin boostada.
- Sida waafaqsan [tallo jeedinta USPS](#), waxaad warqadaada cod bixinta soo dirtaa ugu yaraan hal todobaad ka hor kama dambaynta taariikhda gobolka qabtay si loo hubsado in ay soo gaarto xafiiska doorashooyinka waqtiga loo qabtay.

- Sida ku xeran sharciyada maamulka iyo hababka, waxaa dhici karto in aad awood u yeelatid in aad qof ahaan soo celisid warqadaada cod bixinta ama ku soo ridid sanduuqa lagu rido ee laga helo deegaanka.

Gobolo badan ayaa u ogolaada cod bixiyeyaasha in ay la socdaan xaaladda ay ku sugan yahiin warqadaha cod bixinta laguugu soo diro boostada.

Xasuusin: Sarakiisha doorashada waxay si dhab ah u tixgeliyaan waxyaabaha kuu asturan, waxay qaadaan talaabooyin badan si loo hubiyo in aad si gaar ah u dhiibatid codkaada. Sarakiisha doorashada waxay hayaan diiwaanka ku saabsan haddii aad dhiibatay warqadda cod bixinta, balse marna ma awodaan in ay sheegaan sida aad u dhiibatay codkaada.

Waxaad heli karta macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan cod bixinta boostada gobolkaada, kana mid ah la socoshada warqadda cod bixinta boostada haddii laga isticmaalo gobolkaada, bogga internetka eac.gov/vote.

Helitaanka Cod Bixinta Boostada

Ka hubso xafiiska doorashooyinka gobolka ama deegaanka si aad u heshid macluumaadka ku saabsan fursadaha lagu codsado, sumadeeyo, iyo lagu soo celiyo warqadda cod bixinta. Si aad u heshid macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sida loola xariiro cod bixinta habka boostada, fadlan fiiri [Dhaqanka Wanaagsan \(Best Practices\): Helitaanka Cod Bixinta Boostada](#).

Sidee ayay u shaqeyaan sanduuqyada lagu rido (drop boxes)?

Gobolada qaar waxay cod bixiyeyaasha u ogoladaan in ay warqadahooda cod bixinta boostada/maqanaha ku soo celiyaan sanduuqa lagu rido ee sugan. Sanduuqyada lagu rido waxay meesha ka saaraan baahida loo qabo shabadda lagu soo celiyo maxaa yeelay waxay cod bixiyeyaasha u ogoladaan in ay warqadahooda cod bixinta toos ku soo celiyaan sarakiisha doorashada, baddalkii ay isticmaali lahayeen adeegga boostada. Tani waxay waxtar u leedahay cod bixiyeyaasha laga yaabo in aysan haysanin waqti ay warqadda doorashada ku soo celiyaan boostada.

Si aad u dhiibatid codkaada adiga oo isticmaala sanduuqa lagu rido (drop box):

- Waxaad warqadaada cod bixinta gelisaa gudaha bakhshadda lagu soo celiyo warqadda cod bixinta kaddibna buuxi dhamaan macluumaadka la soo codsaday ee ku qoran bakhshadda soo celinta. Gobolada qaar waxay dalabadaan xafiiska xaqiijinta (notary) ama saxiixa marqaati marka uu doono in uu boostada ku soo celiyo warqadaha.
- Waxaad warqadaada cod bixinta ku soo celisaa sanduuqa lagu rido ee bulshadaada.(Xasuusin: Hubso in sanduuqa lagu soo rido warqadaha aad si cad u

soo calaameysid kuna soo qortid in laga leeyahay dagmada, magaalada, ama xaafadda aad adiga daggan tahay.)

- Haddii aad isticmaaleysid sanduuqa lagu rido warqadaha, hubso in aad warqadaada cod bixinta aad ku soo direysid boostada soona celisid ugu dambayn marka la go'aamiyay in la xero goobaha cod bixinta Maalinta Doorashada (Election Day).

Gobol kasta wuxuu leeyahay sharciyo u gaar ah iyo sharuudo lagu sugo ammaanka sanduuqyada lagu rido. Badanaa, sharuudahaan waxaa ka mid ah qufulo ama xermo gaar ah, kormeerka fiidiyowga, iyo silsiladda sharuudaha haynta. Gobolada iyo goobaha qaar waxay sanduuqyo dhigaan gudaha dhismooyinka dawladda ama meelo sugan oo loogu talagalay dagmada. Sarakiisha doorashada keliya (badanaa kooxaha labada xisbi) ayaa loo ogol yahay in ay soo aruuriyaan warqadaha cod bixinta kaddib marka lagu rido sanduuqa. Si aad in badan uga ogaato side sarakiisha doorashada u sugaan sanduuqyada lagu rido, fiiri [tilmaanta](#) ay soo saareen EAC iyo Wakaaladda Cybersecurity and Infrastructure Agency (CISA) kana shaqeyso isticmaalka iyo ammaanka sanduuqyada lagu rido.

Booqo eac.gov/vote si aad dhakhso ula xariirtid bogga internetka doorashooyinka gobolka ama deegaanka si aad u xaqiijisatid haddii xaafadaada laga heli karo sanduuqyada lagu rido.

Aniga waxaan ahay muwaadin Mareykan balse waxaan ku noolahay waddan kale. Sidee ayaan codkeyga u dhiiban karaa?

Cod bixiyeyaasha militariga iyo kuwa daggan dibadda iyo qoysaskooda waxaa ka hor yimaada taxadi gaar ah oo la xariira cod bixinta. Badbaadinta kale, waxaa ka mid ah, in sharciga federaalka doono in (1) cod bixiyeyaasha militariga iyo kuwa ku maqan dibadda isdiiwaan gelin karaan iyo in ay elataroonig ahaan u heli karaan warqadda cod bixinta, iyo (2) in loo diro warqadda cod bixinta ugu dambayn 45 maalin ka hor inta aan la qabanin doorashooyinka federaalka. Waxaa jira gobolo badan oo qaba badbaadin dheeraad ah oo loogu talagalay cod bixiyeyaasha militariga iyo kuwa ku sugan dibadda xagga dhamaan doorashooyinka, ma aha doorashooyinka federaalka keliya.

Sharciga gobolka wuxuu go'aan ka gaari doonaa sharuudaha dagganaashada muwaadiniinta dibadda ku nool in ay codkooda ka dhiibtaan doorashooyinka gobolka iyo federaalka. [Brograamka Kaalmada Cod Bixinta Federaalka \(Federal Voting Assistance Program\)](#) (FVAP) wuxuu leeyahay ilo loogu talo galay xubnaha adeegga, qoysaskooda, iyo muwaadiniinta ku sugan dibadda ee raba in ay codkooda dhiibtaan. Cod bixiyeyaasha waxay isticmaali karaan [Tilmaanta Kaalmada Cod Bixinta \(Voting Assistance Guide\)](#) FVAP si ay macluumaad dheeraad uga helaan cod bixinta gobolkooda, iyo sida loo codsado loona soo celiyo warqadda cod bixinta.

Maxay yahiin xuquuqda aan leeyahay cod bixiye ahaan?

Gobol kasta wuxuu leeyahay sharciyo xakuma sida loo fulliyo doorashooyinka, hase ahaatee waxaa jira dhowr sharciyo federaal oo badbaadiya xuquuqda cod bixinta ay leeyahiin muwadiniinta Mareykanka ee loo ogol yahay. Sharciga Xuquuqda Cod Bixinta 1965 (1965 Voting Rights Act) wuxuu reebay takoorka iyo wuxuu maamulada ka rabaa in dhamaan maamulada laga helo kaalmada cod bixinta marka laga reebo dhowr daruufo, iyo in Sharciga Cod Bixinta Kaalmee Mareykanka (Help America Vote Act) bixiso in (1) cod bixiyeyaasha waa in ay awood u leeyahiin in ay si gaar ah iyo si madax banaan codkooda u dhiibtaan, (2) waa in la siiyo fursad ay ku baddalaan ama ku saxaan warqadooda cod bixinta ka hor inta aysan dhiibanin, una (3) ogolaato cod bixiyeyaasha in ay codkooda u dhiibtaan si ku meel gaar ah ama ku dhiibtaan warqadda cod bixinta toosinta.

Xuquuqda aad Leedahay Marka aad Dhiibatid Codkaada

Sharciyada doorashada federaalka waxay badbaadiyaan xuquuqda cod bixinta iyo hawsha doorashada. Guud ahaan, cod bixiyeyaasha waxay xaq u leeyahiin in:

- Ay dhiibtaan codkaada haddii ay weli ku jiraan safka marka goobta cod bixinta la xero
- Ay weydiistaan warqad kale aad ku dhiibatid codkaada haddii ay wax kaa qaldaan
- Ay weydiistaan warqadda cod bixinta ku meel gaarka haddii qofka uusan ku jirin liiska yaal goobta cod bixinta.
- Ay weydiistaan warqadda cod bixinta weydiisataa shaqaalaha goobta cod bixinta haddii ay u baahan yahiin kaalmo in loo akhriyo ama in ay fahmaan sida loo dhiibto codka.
- Aan la cabsi gelinin ama la dadeedin inta ay dhiibanayaan codkooda

Cod Bixinta Qofka Itaalka Darran

Sharciga federaalka wuxuu badbaadiyaa cod bixiyeyaasha itaalka darran. Marka la tilmaamo, cod bixiyeyaasha itaalka darran waxay xaq u leeyahiin in:

- Ay si gaar ah iyo si madax banaan u dhiibtaan codkooda
- Ay helaan goob la tagi karo ay codkooda ka dhiibtaan lagana helo mashiino loogu talo galay cod bixiyeyaasha itaalka darran

Cod bixiyeyaasha waxay:

- Kaalmo ka raadsan karaan shaqaalaha ku sugan goobta cod bixinta ee loo tababaray in ay isticmaalaan mashiinka cod bixinta la heli karo, ama
- La imaan karaan qof iyaga ku kaalmeeya in ay dhiibtaan codkooda

Cod bixiyeyaasha waxay codsan karaan macluumaad ku saabsan taakuleynta cod bixinta, kaalmada cod bixinta, iyo hababka warqadda cod bixinta maqanaha ee la heli karo.

Si aad u heshid macluumaad dheeraad ah, booqo eac.gov/vote ama la xariir Guddiga Kaalmada Doorashada Mareykanka (U.S. Election Assistance Commission), telefoonka 866-747-1471 ama emailka listen@eac.gov. Macluumaadka ku saabsan Sharciga Mareykanka Itaalka Darran (Americans with Disabilities Act) waxaa laga heli karaa ada.gov.

Ilo dheeraad ah

Isha ugu wanaagsan ee laga helo macluumaadka la xariira diiwaan gelinta cod bixiyaha gobolka iyo sharciyada cod bixinta waa xafiiska doorashooyinka gobolka ama deegaanka. Booqo eac.gov/vote si aad linki aad si degdeg ah ula xariirtid bogga internetks doorashooyinka gobolka ama agagaarka.

Waxaad macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sharciyada federaalka ka heli kartaa bogga internetka Qeybta Xuquuqda Madaniga (Civil Rights Division) justice.gov/crt/voting-section.

Si aad u heshid sharciyada xuquuqda cod bixinta federaalka iyo badbaadinta, iyo macluumaadka kale ee la xariira cod bixinta, booqo usa.gov/voting iyo vote.gov.